



CYNGOR IECHYD CYMUNED  
COMMUNITY HEALTH COUNCIL

Golleyaasha Caafimaadka  
Bulshada (Community Health  
Councils 'CHC') waa codka  
madaxbanaan ee dadka Wales  
dhex jooga ee isticmaala  
adeegyada Caafimaadka  
Qaran (NHS-ta)





## **CHC – Yaan nahay?**

Golleyaasha Caafimaadka Bulshada (Community Health Councils 'CHC') waa codka madaxbanaan ee dadka Wales dhex jooga ee isticmaala adeegyada Caafimaadka Qaran (NHS-ta). Waxa aan ka kooban nahay mudatawaciin iskaa wax u qabso ku hawlgala oo u dhaqma sidii ay yihiin indhaha iyo dhegaha bukaanada iyo dadweynaha.

Waxaa jira 7 CHC-yo ah oo ka hawlgala qeybo kala duwan oo Wales ka tirsan.

Waxa aan dadka ku dhiirigelinaa kuna taageernaa in ay cod ku lahaadaan qaabeynta iyo bixinta adeegyada NHS-ta.

Waxa aan bixinaa isku xir muhiim ah oo dhex mara kuwa adeegyada NHS-ta qorsheeya iyo kuwa bixiya, kuwa kormeera ee xeerarka u dejiya iyo kuwa isticmaala.

## Maxaan sameynaa?

Anaga waxa aan:

- Arrimaha caafimaadka ka soo eegnaa sida ay fikradaha dadweynaha qabaan yihiin.
- Booqanaa adeegyada degaanka si aan u maqalno fikradaha ay qabaan iyo waayo-arragnimada ay la kulmaan bukaanada iyo kuwa daryeela.
- Eegnaa qorshooyinka iyo tallo soo jeedinta NHS-ta ee heer degaan iyo heer qaran si loo hubiyo in ay haqabtirayaan baahida bulshada degaanka.
- Si joogto ah ula kullannaa maareeyeyaasha NHS-ta
- Dadka bulshada degaanka ka mid ah kala hadalnaa fikradaha ay ka qabaan iyo waayo-arragnimada ay kala kulmaan adeegyada NHS-ta.
- Bixinaa adeeg aan qofka lacag looga qaadin, sir xafidaad leh oo madaxbanaan oo loo fidiyo dadka raba in ay soo hadal-qaadaan wax welwel ah oo ay ka qabaan daryeelka iyo daaweynta NHS-ta bixiso.

## Oraahdaada Dhiibo

Waxaa jira siyaabo badan oo aad noogu caawin karto in aan adeegyada NHS-ta wax ugu tarno.

Waxa aad sameyn kartaa in aad:

- Nala wadaagto waayo-arragnimada aad NHS-ta kala kulantay.
- Noo shegto fikradahaaga ku saabsan sida ay tahay in adeegyada NHS-ta gobtaada loogu qorsheeyo loona bixiyo.
- Si mutadawacnimo oo iskaa wax u qabso ah noola shaqeyso oo aad CHC-da xubin ka noqoto.

Waxa kale oo aan awoodnaa in aan ku kaalmeyno Haddii aad rabto inaad soo bandhigto wax aad ka welwelsan tahay oo ku saabsan daryeelka iyo daaweynta NHS-ta bixiso aadna jeclaan laheyd taageero aad ka hesho adeegayada dacwad taageerista.

Haddii aad jeclaan laheyd in aad warkan la baahinayo hesho isaga oo qaab iyo/ama luqad kale ah, fadlan nala soo xiriir. Waxa aad ka soo degsan kartaa website-kayaga ama koobi/nuqul baad codsan kartaa adiga oo xafiiskayaga la soo xiriiraya.

[www.communityhealthcouncils.org.uk](http://www.communityhealthcouncils.org.uk)  
02920 235 558

